SOOMAALI BEEN MA MAAHMAAHDO

Qore

Cumar Maxamud Cilmi

(C/SULDAAN)

XUQUUQDA BUUGAN OO DHAN WAXAY U DHAWRSAN TAHAY QORAHA. SIDAAS DARTEED BUUGAN LAMA SII DAABICI KARO LOOMANA SII BADIN KARO WEJI KASTA IYADOO AAN FASAX LAGA HEYSAN QORAHA. !!!

HORDHAC

SOOMAALI BEEN MA MAAHMAAHDO: waa buug ku saabsan Maahmaahyada Soomaalida sida magacii-saba ka muuqato,waxaana ku qoran 1400/ xabbo oo maahmaah ah oo dhammaantood si toos ah iyo si dadbanba u saameeya Suugaanta,Dhaqanka iyo nolol bulshadeedka Soomaaliyeed ee faca weyn.

Haddaba si buugga akhriskiisu u sahlanaa-do wuxuu ku qoran yahay habka taxa shibbaneyaa-sha af-soomaaliga (Alphabetic order) oo si heer sare ah loo habeeyay. Buuggu waa kii ugu horreeyay uguna mudnaa ee laga qoro maahmaah-yada Soomaalida markii laga eego xagga tirada iyo tayadaba.

Sidaas darteed waxaa la rajeynayaa in akhristayaasha xiiseeya wax akhriska gaar ahaanne suugaanta Soomaalida ay aad uga heli doonaan buuggan maadaama uu si cad u qeexayo magaca uu sito ee ah "SOOMAALI BEEN MA MAAH-MAAHDO".

Bad dhan hal malaay baa qurmiya
Badda meeshii laga kabadaba waa ka dhanaan
Barti yagaan bar uma kororto
Barxadaa ma bakhtiyo
Baryo badan iyo baahi badan waa laysku nagaa
Barasho beri weeye baxsiinane bogol weeye
Barasho horteed ha i nicin
Barasho yari waa bil saddexaad
baroortu orgiga ka weyn
Barruur baa barruur qurmisa
Barruurtu haweenka way bishaa haddey ka badatase way bi'isaa.
Barruuro sabool badhaadhaa leh
Bagal fardo la daaqday faras bay is mooddaa
Bakeyle intuu god ku jiro ayuu god kale eegtaa
Bakeylow nin iyo bur
Balad ku roonaa baadiyo ku roon
Balaayo saglan saglan baa ka horreeya
Balaayo ka hor tag bay leedahay ee ka daba tag maleh
Balaayo kaa sii jeeddo la iskuma soo jeedsho
Balaayo laysla qabo baas maleh
Balaayo looma hormaro loomana daba maro
Balaayo ninkii kaa rabo bawdkaaguu goryeystaa
Balaayo ama il la'eyd amo lug la'eyd
Balaayo intey kaa maqan tahay qeyrkaa bay ku jirtaa
Ballan darro waa diin darro

Ballan habeen kalahyo arooryo buu leeyahay
Bannaankiisa mare maradiisa geed ma qabsato
Bahal ceeriin ma daayo ninme caadadii ma baajo
Baadi lo'eed biyaa loo fariistaa
Baadi nimi laheyn bay ag joogtaa
Baadi iyo nin leh aragti baa ka dhexeysa
Baan bil ba badan iyo baryo cawo ka badan waa laysku nacaa.
Baahi nin kuu daran bay kuu geysaa
Beer ku taallo iyo cadkeed waa laysla gooyaa
Bel laf lagama fisho
Beec waa ku dar iyo ka dhin
Been fakatay run ma gaadho
Beeni raad maleh
Beeni waa cilmi sheydaan
Beentaada hore runtaada dambey u daran tahay
Beenlow nin dhintay iyo in dheer buu marag gashadaa
Biri way booddaa
Bisadi garoor ma cabto aabbaheedna geel ma tacbo
Bisinka Alla nin qabtay calaayo uma timaad
Bil saddexe kuma guri geyso
Bil dhalatay ku dhaaftay
Bilo shiddo waa in yar
Biyaha aad korkooda aragtaa hoostoodu waa dhoobo
Biyo sare tagay waa la sugaa
Biyo sacabadaadaa looga dhergaa

Biyo fadhiyo biyo socdaa kiciya
Biyo meel godan bay isugu tagaan
Biyo intaanay ku soo gaarin baa la iska moosaa
Booddo qoyaan baa lagu qabtaa
Boogtaan dawee is lahaa iyadaaba i cuncuntay
Bude qabe iyo biyo qabe way isku baahan yihiin
Burkii la eeynay bootintiisaa la rabaa
Bushi geeri og iyo baahi guri og midna lagama kaco
Bushi maraggi waa matag
Bulsho adaa ku nool ee iyadu kuguma noola
Bun haddii la waayo beddelkiis baa la helaa
Buur ahaaw amo buur ku tiirsanoow
Buunkii la xado meel lagu yeershaa la rabaa
Tagoog ludda ka cun libna ha uga heyn
Taladaan la ruugin waa lagu rafaadaa
Talo xumo tog bay kaa ridaa
Talo xumo tol ma badiso
Talo xumo waa lagu talo bartaa
Talo dallaal lama raaco
Talo keen ahaaw amo talo raac ahaaw
Talo nin kuma filna labane ku heshiin weyday
Talo walaal diide turaanturo ma huro
Talo waa tii rabbi
Talo waa kugu barido iyo kugu soo booddo
Talo waa mar aad garan weydo iyo mar aad gaari weydo
Talo adigaa ku nool ee iyadu kuguma noola

Talo isuma kaa sheegto
Talo iyo tamar in yar baa laysla helaa
Tan tagtay daa oo tan joogta qabo
Taabba taab baa lagu gaaraa
Taataabashaa lagu bartaa tuuganimo weyn
Taag lahoow ama tab iyo xeelad lahoow
Tiro koob la'aan waa tabaalo qaran
Timir laf baa ku jirta
Timirtii horeba dab loo waa
Tiisa daryeelaa tu kale ku dara
Togba taagtii buu rogmadaa
Tol yaraaday tafo naageed baa laga dayaa
Toox raagay sagaaro waa ka fakataa
Tuba tu ku iloow
Tuhun waa sed
Tuug tuug ma xado
Tuug la qabtay talo maleh
Tuugmo aadane tuur bay kuu yeeshaa
Tuuge lama tuugo ee tanaadkaa loo tagaa
Tuugo ku taqaan tabtaa ma weydo
Jaceyl indho maleh
Jid fureey haddaan lay laheyn jaradu tay maaha
Jirkii la haye jariid kama qoslo
Jiljileec looma dhinto adadeygaa laguma waaro
Jilib waayeel kuftin wax uga daran
Jinni ninkii keenaa bixiya
Jinni iyo jinkaa waa ku duufsadaan

Jiifka jiif baa kaaga horreeyay
Jiilaal waa ninkii haye
Jumlaa jid falata
Xabaal qode xabaashiisaa la qodaa
Xade lama xado
Xarrago xanuun maleh
Xaraash iyo xoolo jaban
Xarig keliya geel ma wada xiro
Xarig habeen ninkii xiraa fura
Xarig aan hayo xoolo kuma jiraan
Xas ul ku dhigo wixii ku jira ha soo baxaane
Xaglo laaban xoolo kuma yimaadaan
Xaq feeruhuu ka dilaacaa
Xalaal iftiin baa la qashaa
Xalaaley ma ba'did
Xamar xisaab xarar dheere xoog
Xamaaliyow xooggaa xalaal
Xantaada xiinkeedaad maqashaa
Xayn yari sabool bay eedday xididna hadal buu eeday
Xaajaba xeel leh
Xaajadaan la rogrogin rag baan helin
Xaajo dibno la qabtey leedahay ee dabo la qabto maleh
Xaajo markii ay joogtaa la dhameeyaa
Xaajo nimaan ogeyn indhuhuu ka ridaa
Xaajo nin la toosan baa nin la tuur leh
Xaajo ninkii hayaa gaabiya ama dheereeya

Xaajo waa keyn iyo waddo
Xaajo waayeel waa guud mar
Xaajo aan sidii daba ri' loo feydin fiyoobi lagama gaaro.
Xaaraan xero ma buuxiso
Xaasid ma bulaalo
Xer ka duceyso amo xigaalo ka duceyso
Xeydha jecli beerka jecli kala daa
Xeer waa negaadi
Xeero salkeed lama arko
Xidid baal ka irmaan iyo baliba waa guraan
Xidid doqon xanuun maleh
Xidid is tus oo is bar oo isaga tag
Xisaab la'aani xoolo waa dhumaan
Xisaabi xil maleh
Xikmadi ruux waalanne kama maqno
Xil dhallaan gartay weynaa
Xog warran xoolo ma noqdo
Xogtaada hoose ninne lama baro
Xoog rag baa xoolo ku jiraan
Xoog haddaad weydo xeelo ma weydid
Xoogsadaa xalaal quuta
Xoola beec ah waa la helaa dad beec ahse lama helo
Xoola quureed waa la qaataa hadal quureedse lama qaato
Xoolahaaga xeer ama xero mid ha kuugu jireen
Xujo ma falanto ee xaajaa falanto
Xunbo iyo xiiso way dhacaan
Xuunsho markii labo dhagax ku dhacaan bay wax kala garataa

Khaa'in afkuu kugu dhunkaday buu kugu qaniinaa
Dab baxayaa dab laga qaataa
Dab ninkii ku gubta dambaskiisuu ka baqaa
Dab iyo dawlad midna lama horjoogsado
Dabkii munaafaq shiday muumin baa ku gubto
Dabkii aad kulkiisa aragto dambaskiisaa laga leexdaa
Dad dad baa loogu gabadaa dugaagne geed
Dad kaa badan iyo biyo kaa badan way ku hafiyaan
Dad kuma wada amaano ee yuu ku wada ceyn
Dad lama maleeyo ee waa laga maleystaa
Dad lama ilaalin karo ee duunyaa la ilaalin karaa
Dad mar baan dayaa dugaagne laba mar
Dad nin tuugay iyo nin u taliyay baa yaqaan
Dad wax ka xan jecel duunyane wax ka xaab jecel
Dad wax yare tare mooyee wax ma tare maleh
Dad iyo dameeraba nin leh bay u daaqayaan
Dad iyo duurba waxaadan ka fileyn baa ka yimaada
Dadne ma hayo dabane iima fiyoobo
Dadaal waad gaari doontaaye
Darandooriyaaba naas naasi.
Dagaal gondahaaguu ku dhashaa
Damac badne dariiquu ku dhintaa
Damal walba in gubta way hoos taal
Dameer iyo doc ka yeerba daankaa la jebshaa
Dameer iyo nin fuushan daymaa iga deeqda
Dameera ooman ninkii oodda ka qaadaa aroorsha
Dameeri tan ugu fool xun baa ugu harraari kolul

Dameeri dhaan raran raacday
Dameeri maalin bay duunyo noqotaa
Dameeri waxay daamanka uga jabtaa dab ha kaa haro
Dameeri isku halleyn bay habarteed dabada uga nuugtaa
Dameero kir bay u wada dhegataagaan
Damiin faro waaweyn baa wax loogu dhigaa
Dan la iskuma naco
Dani xishood maleh
Dani ceeb maaha ee dadka uun baa iska nacay
Dani kuuma been sheegto
Dani ninkeed ka adag
Dani waa seeto
Dantaada cudurdaarasho kaagama hadho
Dantaada maqaar eey baa loogu seexdaa
Dantaada iyo madaxaaga midna lagama boodo
Danti mooge maro duuge horteed buu dhamaadaa
Dawaco meeshii ay macal ugu baratay bay macluul ugu bakhtidaa.
Daylo dabadey ku asooli may ku aroorto
Daad la'aan doox sooma rogmado
Daacadi ma hungowdo
Deriskaaga diintiisuu kuu yeelaa
Deriskaaga dooro iga cesho lama yiraa
Deriskaaga waa ilaalo aan laguu dirin
Degdegi door ma dhasho
Deyro hore deeq kama dhaco
Deyn bixiye dirir ma gefo
Dib u dhac baa qoonsimaad leh

Dibi hooyo xumi korme ma noqdo
Dibigii oowr noqonaayo edeguu ka tilmaaman yahay
Digaagu qurunka waa wada cunaa af tirtirkuuse is dheer yahay.
Diqsi dantii buu qurun ugu jiraa
Diqsi inta la isaga dhiibuu ku dhintaa
Diqsigii garoor ku dabaal bartay fuud kulul buu ku gubtaa.
Diidayda hore kuma xishee diidayda dambe yey ku ili
Diinku ilmihiisa eegmaduu ku korshaa
Doqon ka hadli isagaa is diliye
Doqon lalama derso
Doqon looma danaansho
Doqon ha u gargaarin hana gargaarsan
Doqon hubkiisaa lagu dilaa
Doqon ilaahey amarkiis yaqaan ushaada looma dhiito
Doqon iyo deyr deeqooda kama haraan
Doqon iyo naag nimey legdeyn kama kacaan
Doqon usha agtiisa ku dhifo hadduu garan waayana iraga
Doqoni kurigeeda xasuladey ku sidataa
Doqoni xin mooyee xisaab maleh
Doqoni dagnaan lagama waayo
Doqoni sidey u taaq badan tahay uma tamar badna
Doqoni sirteeda sacabadey ku siddaa
Doqoni soo noqo wax siin bay mooddaa
Doqoni shib aheyd amo sheeg xumeyd
Doqoni dhabta iyo dheesha dhug uma kala leh
Doqoni dhiiladu ma dhacsana
Doqoni casirkii wixii lagu caayo bay cishihii kugu cayo

Doqoni calaf maleh
Doqoni gar ma gasho kamana baxdo
Doqoni qufacday meel looga yimidse ma aqaan
Doqoni libin aanay dhalin bay ku faantaa
Doqoni meeshii lagu kaftamo in lagu kala tegeey mooddaa.
Doqoni meel lagu dirireey ogeyde meel lagu heshiiyay ma ogeyn.
Doqoni nin u daran ma taqaan
Doqoni wax ka dabeecad xun
Doqoni wixii u daran bay iloowdaa
Doqoni halkii lagu qatali bay qoorta soo dhigan
Doqoni hoos dad bay har mooddaa
Doqonimo daawo maleh
Doob dareen baa dilay
Doofaar ficil la'aan baa loo cadaabaa
Doonaa waa gaarda
Doonni buuxdaba bad looga tag
Doonni dad badan isla wado way degtaa
Dudun dheeraatay dhulkey ku soo laabataa
Dudun in la dugsado iyo in la dareensado la iskuma daro
Durduro geel baa ku jabay
Duco dhammaanteed waa dhuroow
Duco iyo duul yar
Dumar mid ka badan iyo dameera mid ka badanba ninkii wato waa dhibaan.
Dumar iyo duunyo inta la yar yahay baa la tacbaa
Dumaal nin ka xishoodo kama ilmo dhalo
Duunyo kaa carareyso waa la ceshadaa dad kaa cararaayase lama ceshado.

Rabbi talo ku filan
Rati ceel badan ka cabay midduu ku goleystay lama yaqaan
Rajo iyo rafaad waa wada dhasheen
Raxan marodi iyana isma dhex marto in la dhex marana ma oggola
Rag bi'iis buu ka sheekeeyaa dumarne badhaadhihiis
Rag jid la mar jidiin la cun oo jabad la deg
Rag xuuradiis ma oga xantiisase ma mooga
Rag rajuu ku hurdaa
Rag riyo ma maalo reerkiisane ma mooga
Rag calooshii la ciyaar iyo ciil kama baxaa u liita
Rag ciil cadaab ka dooray
Rag gar qabsi waa ku nugul yahay gunti qabsise waa ku adag yahay.
Rag gogol xumo u daran dhurwaane god xumo u daran
Rag la'aani wax kuma yeeshee rag xumaan baa wax ku yeesha
Rag la'aani wax kuma yeeshee ra'yi xumaan yey wax ku yeelin.
Rag mazkuu tagaa la tabaa
Rag muraad la'aan meel wuu u maraa umase fariisto
Rag waxaan naftiisa aheynba maaree
Rag waran baa walaaleeyo
Rag walaalow wuxuu ku dhaamo la waa
Rag waa barasho geelne waa rarasho
Rag waa mid qab weyn iyo midaan u qabin
Rag waa mid naag guursaday iyo mid naakiro guursaday
Rag wuxuu kugu bartuu kugu dilaa
Rag hareertaadaa laga daaba
Rag aamusay iyo riyo aamusayba reerkoodi gabe

Rag is galay kala gallad la'
Rag iska riix iyo rabbi ka cabso meel islama galaan
Rag iyo geelba meeshii ay ka didaan lama mariyo
Rag iyo mas midna lama yaso
Rawis reerkiisa looma dhaamo
Ra'yi kaa maqan waa raaxo kaa maqan
Raad arooryo gadaal looma raaco
Reerkaan rabay roob igu eri
Reerkii balaayo loo soo balaqay bawd ka celin maayo
Reero kala guuray ninba naagtiis raacday
Ri' geeso leh ninkii liqay wax ka weyn baa uga horreeyay
Ri'qalan maqaar bixis ma dhibo
Ri'kasta shilalkey is dhigtaa lagu qalaa
Riyo lugtoodaa shalaw u soo jiiddo
Riyo haddey dub leeyihiin dabadoodey ku qarin lahaayeen
Riibi geedo ma daaqo lagamana daaqo
Roob geel baa caano leh jiilaalne yaa kale
Roori doonow ha igu raad gadan
Roonaane Rabbaa og
Run sheege waa Rabbi ka yaabe
Run iyo been kala raad leh
Run iyo ilkaba waa la caddeeyaa
Runta ragga way ka nixisaa mase disho
Runtaa sheeg beentaa ha la moodee
Ruux kasta dhiishuu ruxduu caanaheeda dhamaa
Ruux habaaran hurdo kama dhergo
Ruux aan sal laheyn sedkii laalan
Ruux irbad haystaa dun la weydiistaa
Ruuxba wixii uu dhiteystuu sharcigu dhaanso yiraa

Sabti sarbi qooqan
Saxaro qori dheer baa la isaga tiraa
Saxan bariis ah cunug calool wuu geliyaa mase koriyo
Saxan saxan ku gud saan saan ku gud
Sakhi lama cadaabo
Sad Ilaahey ku siiyay saluugmo maleh
Sadar muuqda su'aal uma baahna
Sadaqo yaraan maleh
Sarar ma gadanto ee suuq baa gadmo
Sac dibi galay ma dihno
Sac ninkii lahaa seynta uga fadhiyo sidee loo kacsin
Sacab habeen maxaa loo tumaa
Sagaaro bad ku kaadisay naceedey muujisay
Sagaaro biciidka waa la fac
Sagaaro saalo la arkayo bay aastaa
Sagaaro labo tun oo la qaado maleh
Sagaaro waa labo nin ku dubad
Sagaaro weligeed dad ma kala barato
Sagaaro inteeda waa ku duq
Sagaaro iyo tuuryo in yar baa laysla helaa
Safar waa si u wada yaalle
Safarow waxne gado waxne garo
Saqiirkii sididaada oggol baa la sidaa
Sal nageed iyo salaax beereed midna laguma eryo
Salaad sida ay kuu qabataa loo tukadaa
Salaad nin qaleeyay sii daa
Salaad waliba waqtigeedaa la tukadaa

Sallal laguma fadhiyo ee soor baa lagu fadhiyaa
Sama fale sedkii waa janno
Samo lama wada geysan karo
Sanji waa ma guuraan
Sawir baa yaqaan seexo oo dhereg
Saaxibka baahan waa saaxibka runtaa
Saaxibkaa marne waa kuu sahan marna waa kuu sabab
Saaxibkaan sir aqoon sina uma xumaado
Saa dambaad garan
Saacadi si u socod baratay
Saannu yeelnabo saannu eednay
Seedigaa kuma xiltiro xilo haddaad weydo
Si jirtaa siima jeeddo
Sibraar sahay maaha
Sida ay u geesc weyn tahay uma adko
Sidaad isu taqaan maaha waa sida laguu yaqaan
Sidaan kuugu lisay iiquma hambeyn
Sidee xeego loo xagtaa likene ku nabad galaan
Siddi siddidaada mooyee dhul u dhacaagu hubso
Sir dawaco iyo ballan bog ku socoto waa silloon yihiin
Sir ma qabe saab baa biyo u celiya
Sir naageed lama sal gaaro
Sirroow ma hodmo
So'sagaaro ninkii saluugo saanteedaa la tusaa
Soori isla cun bay ku maqaan tahay
Soomaali been ma maahmaahdo
Soomaali in i barato ka badan

Subag daatay dabadiisaa la qurqurshaa
Subag daawo dambaa loo cabaa
Subag weel ku daatay sina uma xumaado
Suri waa nin ku jabsi
Surun waa kulmiye
Sumalow Ido seeg oo riyo seeg oo dhexdooda salbaq salbaqley.
Suul faro kuma tirsana
Shabeel aqoonis ha loola diriro
Shabeel aan la dilin haraggi lama iibsado
Shardi indho maleh ee sheekh baa indho leh
Sharku yaryareysi maleh
Shaqeystaa waa dhergaa shaxaadaa waa qadaa
Shaki yaqiin baa ka roon
Shalay uun bay dhalataye sheeko dheeraa
Shallay waa shey xaaraan ah
Shallaay wuu dambeeyaa
Shan cawo sheekh laguma noqdo
Shan gacmood shey isuma dhiibto
Shanta farood ma sinno
Sheydaan nin habartii dila waa yahay habar sheydaanne wax la dila waa tahay
Shir looma wada uunsiyo
Shilin xaaraan ah shilin xalaal ah ma dhalo
Shimbir baalal laga rifay ma buubto
Shimbir duul duul badan madax abeesuu isku taagaa
Shimbir gacan ku jirta dil u dhaw deysmane u baahan

Shimbir labo geed kama wada bardeysato
Shimbir maalin bay dab qaaday oo aqalkeedi bay ku qabatay.
Shimbir walba shimbirkiisuu la duulaa
Shimbir walba codkiisuu yeeraa
Shimbir iyo shiid in yar baa laysku dhuftaa
Dhabarow dhibkaa qaado waad dheefsan doontaaye
Dhabba yar baa dhabbo weyn kugu dara
Dhabeel ma weydid ee dhaqaale ha weyn
Dhar magaalo waa la gataa dhaqan magaalase waa la bartaa
Dhar aanad laheyn kuma dhaxan tiro
Dhadhanshaa waalan dhergaane ka daran
Dhagax tuujin iyo taabasho waa isugu tab
Dhagax meel dhaw buu ku dhacaa dhawaqne meel dheer
Dhagaxii buurtu heyn weydo bannaankuu u soo baxaa
Dhagar qabe dhulkaa u dhaqaaqa
Dhaanto habeen wax baa ku jira
Dhaayda dhan xoorku ha kuu soo dhacee
Dheri buuxa dheri maran laguma dhifto
Dheri faro badiyay fuud qaraaraa
Dheri la kor taagan yahay ma karo
Dheri ninkii u dhaw baa dheefta kala baxo
Dheri iyo dumar midna yaryareysi maleh
Dhariga karka kuleyl baa ka keenay
Dheg xumo looma dhinto
Dheg haddii la gooyo daloolkaa hara
Dhega geel iyo dhalasho ma guuraan
Dhegihii Alla waanshaa waansan

Dhib dabadii bay dheefi timaad
Dhiri sidey isu xigto bay isu xoqdaa
Dhicisku inta birta loo soo situu bakhtiyaa
Dhimasho waa lama huraan
Dhinaca iyo dhulkaa is leh
Dhoofaa kaa dhimay
Dhubuq dhubuq hore dhabana hays dambey leedahay
Dhurwaa dhereg loo fil dhibkiisane qab
Dhurwaa aragga badan baa lagu nacay
Dhudhun ari laf la dhuuxo maleh
Dhul dheef baa ka buuxdo
Dhul nin dhintay iyo nin noolba waa deeqaa
Dhul nin gamay ma gefo
Dhul wax ka dhib badan oo ka dheef badan
Dhul hagar maleh ee dad baa hagar leh
Dhul iyo wax la dhalay baa loo marti yahay
Dhuumasho dhabarku muuqdo dhuumasho maaha
Cabsi Ilaah baa leh
Cabaad badan waa rag ceebtii
Cadar xagaa ceel kaama furto
Cadawgaaga caano mac baa la siiyaa
Carrab dalab leh lug dalab leh laga garan og
Carrab dheer iyo maskax maran isku madax baa laga helaa.
Carrabkaan la dhawrin cadaab buu ku geeyaa
Carrabkaan la celin xumuu caasha geliyaa
Carruurnimo waa cadaw laga koro.

Carruuri gaalo iyo islaan waa kii lagu daro
Carruuri qeyladui waa qaboonada
Carruuri markaad ilkahaaga tusto bay dabadooda ku tustaa.
Carruuri haddii ay kuftane way ooydaa haddaad kuftane way kugu qososhaa.
Casir iyo carraabo
Cadhoole waa hiishiisi
Cagtaada iyo calooshaada midna lama caasiyo
Cagtii joogsan weydo mar bay ceeb la kulantaa
Caqligaaga qab qiyaastaadane ku darso
Caqligii wanaagsani itaal ka roon
Caku wixii fudud oo aan faras ka aheyn
Calaf waa intii calool gasha
Calaf aan Eebbe kuu qorin kaa durugsanaa
Caleen qurac calool geel waxba kama tarto
Calool jileec gabar baa wacal ku rintay
Calool dhargan calool baahan kama naxdo
Calool dheregtay caqli maleh
Calool adeyg waa Ilaahey wehelkiis
Cantuugo jiilaal canba can buu bidaa
Canaad badan waa cadaabka barkiis
Cannaan ka yaab reer ma doojiyo
Cannaan la'aani carruuri ma korto
Caws geel daaqay caarad go'an
Cawli ban bay u baratay buuri u dhaanteese mooyi
Caado la gooyo caro Alley leedahay
Caafimaad darro cayrnimo ka daran

Caalin cilmi kama dhergo
Caammo intey ku jeeshahyaa ubbadaada laga biyeystaa
Caano daatay dabadaa la qabtaa
Caano mac kas baa biyo loogu daraa
Caano yar iyo ciidan yarba kolka la waayaa la gartaa
Ceyri ceymo ma diido
Ceyri ma bukooto
Ceyn xun ninkeed baa iska leh
Ceebtii kun oo tahay kow looguma daro
Ceeriin cune calooshiisaa ku ciil qabto
Ceeriin iyo biseyl wixii ka dhexeeya waa yacyacood
Ceesaan ari i sii ninkii kugu dhiba wadideedaa lagu dhibaa.
Ceesaantii madax shabeel leefta malageedi baa galay
Ceel geel ka cabay calaamo leh
Ceel nin qalay baa laga wareystaa
Ceel wiyeer waa lama huraan
Ceel aanad ka biyo gaareyn lama qodo
Ceelna uma qodna cidna uma maqna
Ceelaley markii ay heshiiso baa geel biyo cabaa
Cirweynin ceeb maaha ee cunnimo xumaa ceeb ah
Cir Allaa uun Alla oon tira
Cishe kugu caweysimay naftuu kugu caraafaa
Cishe iyo naag xunba dib looma dhigto
Cilmi baan aqaan kaa akhrisan mayaa ka adag
Cilmi bilow buu leeyahay ee dhamaad maleh
Cilmi dhammaantiis waa cabsi Ilaah
Cilmi ha dhigan ciyaarna ha tuman waa cibaaro adduun
Cimri tegay ceeb laguma sagootiyo

Cimri dad Eebbaa xukuma kalase ceyn weeye
Ciyaari waa gelin dambe
Ciirtaada dhammaa ceebtaada yaqaan
Ciil naag kaa raacay iyo caro nirig geel kaa raacday midna lagama bogsado.
Col walaal waa caman isu buur
Col hortii hub sameyso
Colaad ka digtoonow intaad nabad ku jirtid
Cudur kastaa calaamo leh
Cudur aan ceynkiisa la aqoon cidi ma daaweyso
Cudurkii tegi waaya ninkiisaa taga
Cusbaa lagu daraa hilib hadduu caato noqoyaa
Cun si aad u noolaato hase u noolaan si aad u cunto
Gabar baartay garoob baa ka roon
Gabar god ha kuugu jirto amo guri rag ha kuugu jirto
Gabar guur diiday waa qori shidaal diiday
Gabar ninkii dhalay ka hor baa la arkaa
Gabar aanad xeesheeda aqoon lama xikaayeeyo
Gadaal ka gaar waa goob dumis
Gar diiday baa ka adag
Gar labo nin kama wada gosliso
Gar waa loo islaan
Gar ilaaheyd bay taqaan
Gar iyo gafuur isma leh
Gartaada intaadan geedka tegin baa la naqsadaa
Gardarro garab og iyo gaajo guri og midna lagama kac
Gardarro hore qoomama dambey leedahay

Gardiid waa Alla diid
Garaw iidaankii waa gaajo
Garaawshiinyo waa sed waayeel
Garoob guri ha lahaato gabarne ha lahaato
Gacmo geel jire hoos baa loo dhaqaa
Gacmo wadajir bay wax ku gooyaan
Gacal isma ciriiriyo
Gacalo waa gacmo is dhaafay
Gacan jabtay gunteed bay dhex taal
Gacantii qaad qaad baratay gumudkaa dhaqdhaqaaqa
Gacani nin leh bay u go'daa
Gacani wixii aysan heyn waa u geed
Gafuur cadho ninkiisuu dhibaa
Gafuur habeen ninkiisaa xoqa
Gal dad liqa ul baa la isaga dayaa
Gawracaaga nin leh qoortaada looma dhiibto
Gawso tuugeed iyo gawso macsiyeed midba intuu galaa laga gudaa
Gaari iyo guumeys guul isuma oga
Gaashaan qaad ma habaabo
Gaal dil gartiisana sii
Gaal Ilaahey ka dambeeyo ma qoslo
Gaalo jabkeed way qarsataa
Geed dheer dhaxan kaama cesho
Geed mirihiis buu dhalaa
Geed intuu yar yahaa la toosiyaa
Geeri gaal bay ku roon tahay iyo nimaanad garaneyn
Geeri loo dhalay

Geeri necbo iyo gabow necbo la isku waa
Geeri nin hoyan waayey bay hadhsiisaa
Geeri ninkii ay ka raagto gabow baan ka raagin
Geeridu mar bay nolosha dhaantaa
Gees lo'aad kulaylkaa lagu gooyaa
Geesi dharab kuma jiro
Geesi malafsi bartay iyo doqon milantay miidaanyaa ka dhex dhalata.
Geesi Alla ma xilo
Geel badan baan lahaa jiray dameer joogaa dhaama
Geel jire geela wuu wada jiraa waana kala jiraa
Geel jire isagoo usha meeshuu ka goynaayo og buu ogaal weydiiyaa
Geel dab leh iyo garoob qardhaaso leh midna lama qaat
Geel diday dooh dooh loogama haro
Geel durduradu waa u ciyaar ariguse waa u laysmo
Geel sahal kuma rimo shalne kuma dhalo
Geel carruuri qaaday ma dheero
Geel geel weydaartay geedo la'aan baa u leh
Geel labo jir soo wada mar
Geel lagaa dhacay meel magac leh baa looga soo haraa
Geel madaxiisu durduro ma dhaafiyo
Geel muxuu indho kuul ka yaqaan
Geel nabar aanu ogeyn buu ka gagabaa
Geel nimaan aqoon baa saanyay
Geel ninkii lahaa dhacayo yaa soo dhicin
Geela duqdiisu durdurisay aarankiisi maxaad moodday
Geela isagoo wada ooman misna hasha madow kuma sii jirto
Geela inta u wadiyo inta u wad eray baa ku jira

Geelow wax walba cuntaye markaad ciin cunto baa laguu yaabaa.
Geelley ninka ugu da'da yar bay dabarada ku rartaa
Geenyo iyo gabar baa guud la qabsado leh
Gob aan dhawrsan tafahey dhiig ku leedahay
Gobanimo halgan mooyee hoo laguma helo
God sireed ha qodin haddaad qoddane ha dheereyn
God Aakhiro gaddoon maleh
God iyo ninkii loo wado lama kala qariyo
Godobi waa gaaxo
Gol eey baa lagu sahmiyaa
Guda is yaqaan waa isu guuxaan
Gurbaan garabkaaga ha kuugu jiro amo gacalkaa ha kuu hayo.
Gurdan sagaaro geel ma didiyo
Guri buug ku batay garaad baa ku batay
Gunburi ceel ka qaday wuxuu ku quursaday buu qabaa
Guur waa kol ee kaadso
Guuli ma jirto dhib la'aan
Guumeys ninkii geed ka furo gabadhiisuu ku xiraa
Far bugta faraha ka dheer
Far keliya fool ma dhaqdo
Fartaada oo xumaato filfiliq kaagama go'do
Fardo fagaaro joogo maxaa la isugu faanaa
Faras Allaa raray faroow Allaa deeyay
Faras iyo nin fuushan isma qalbi oga
Farihii dufan leh ayaa wax duuga
Farriini waa qaan
Fadhi iyo fuud yicibeed la isku waa

Facaa filsami kuuma quuro fool xumane waa kugu caayaa
Facaa ka har fool xumo ma dhaafto
Faq fagaaruhuu yimaad
Faqiir kaa faan jecel
Fal aan laabta jirin faro wax uga daran
Fallaartii cirka loo riday nin walbow filo
Fallaari gilgilasho kaagama go'do
Faataxo waa faras muumin
Fidno farahaagaa kuu keeno
Fiqi tolkii kama janno tago
Finka caloosha ku yaal carrabkaa dila
Fiintu waxa soo socdey ka ooydaa
Fool is yaqaan fadeexo kuma roona
Fool iyo hurdo kala fog
Fulay ceeriin ma cuno biseylne ma sugo
Fulay waa fool uu yaqaan
Fulay hooyadii ma gablanto
Fulay intuu ba'ayaa badan
Fulay ulo badan
Fulayow guuli kuu dhaw kaane dheer
Fuulmo waa faro ku heyn
Qabsin tuugo qatan
Qabyo waa halkeedi
Qatanaan reer waa la galaa qaawanaanse lama galo
Qatooyo habeen qeyrkaa bay kaa reebtaa
Qar intuu jiray quruuruxna waa jiray
Qalbi dad xaashi maaha

Qalanjo qaybsami weyday
Qaniinyo qaniinyaa kaa fujiso
Qawl waayeel waa golof geed ka dhacday
Qaalin aan da'deeda gaarin dibi laguma daro
Qaani ma qurunto ee ninkeedaa qaato iney weydo mooy
Qeybshaa qad amo qooro buurnaa
Qeybshaa ma qado
Qeyl dameer ma nasto hooyadiina ma nasiyo
Qeylo badan qeyrkaa bay kaa reebtaa
Qeylo gar dhaweysay
Qiiq waa la wada arkaa lamase qaban karo
Qori iyo qiiqiis waa laysla tuuraa
Qorraxdu iyadaa oonka keentay
Qosol qoonsimaad noqoy
Qosol waa quluub iyo ilko caddeyn
Qosol aan laysla qabin qalbiguu wax yeelaa
Qof xishood badan iyo qof kibir badan midna wax ma bar
Qos kasta wuxuu yahuu ku moodaa
Qof kaa xoog badan hortaa buu xanaaqaa
Qof waliba wixii uu dhigtuu dheersadaa
Qof haddaad seexiso oo aad soo toosiso waa isagii uu
Qofne qawlkiis buu hadlaa qorina qiiqiis buu uraa
Qofne labo qalbi maleh
Qofne maankiis ma saluugo
Qoor dheer madaxa ma dhaafto
Qoori xero kuma heshiiso
Qoori qardabo iskama deyso

Qooro lushaa-quud ku jiraa
Qooq ma jabee qofkiisaa jabo
Qooley qoor qabad biyo kuma cabto
Qoomkii bataa wax beddelan baa ka soo bixi
Qurux la'aani qaab la'aan bay kugu dishaa
Qufac iyo jaceyl midna ma qarsoomo
Qunyar socde qodax ma muddo
Quud aan jirin qoryo u guro
Kab xume ma haree kab laawaa hara
kab gantaaleed ninba si u gan
Kadankood waa kuunto wedkeed
Kas waayeel kabbo isma dheero
Kal lo'aad ninkii ka dhuunto kii kalaa sugaaya
Kala bax kitaabahaa qaba
Kalluun mar baa la gawracay
Kaadi badane waa loo gogol badiyaa
Kaaf iyo kala dheeri
Keli nin xiraayo nin furaayaa ka adag
Keli webigaa gadaal ka riixa
Keligii cune keligii buu dhintaa
Kor waayeel waa wada indho
Konton jirow konton kale kuuma harin
Kud ka guur oo qanje u guur
Kulli fidna cinda geel
La jiifiyaane bannaan
La mood noqonse weyday
La hel la hel la waa baa ku xigto

Laba biyo hoostood iska harraatiyay iyagaa is og
Laba tallaabo dhexdood talaa ku jirta
Laba xidid xoolahood waa xero isu furan
Laba daran mid daa
Laba dhaxal ku dirireysa dhalasho ma fiirshaan
Laba col dhexdood cidi kuma barido
Laba faras isku fuulow futadu ku dilaacday
Laba qaawan isma qaaddo
Laba qofood way kulantaa laba buurcoose ma kulanto
Laba kala bariday kala war la'
Laba naag iyo laqdabo
Laba is qabta colna maaha nabadne maaha
laba ood afo iskama abaal weydo
Lababa toog isa saaraye laba tagoog isma saarin
Labadii xaqdarro ku heshiiyay xaq bay ku colowdaa
Labadii sir ku heshiiyay saaq bay ku dagaashaa
Labadii ceeriin ku qeybsato biseyl kuma dirirto
Labadii is jecel lexa jeclaan ka dhexeyn
Labadii is jecelba islaan baa kala geysa
Labadii is dirirto mid baa yadda ku horreeyey
Labadii is ceeb taqaan isma ceydo
Lax dhukani abaar moog
Laxdu gar leh laxuna gar leh
Laxiba lageedey xaadhataa
Laguu sheeg loo dhalay baa ka fiican
Laf dhuux leh iyo labo dhagax laysku waa
Laf kaa weyn way ku jebisaa

Laf waliba sidey u jabtaa loo kabaa
Laftii eey nacay waraabe waa uu cusub tahay
Lafo dabaal yaqaan ma shiidaan
Lafo geri iyakaa laysku jebshaa
Laqanyo tixda geli
Lama canaantaan baa caanihi daadshay
Lama huraan waa cawska jiilaal
Laab la kacay lugase kuma taagni
Laabi labo u la'
Laafyo aan loo dhalan lix talaabo ma dhaafto
Laako sagaaro raq mooyee ruux isma tarto
Libaax nimaan aqoon baa lax ka rita
Lix jir ul buu ka baqaa lixdan jirne faqri
Lixdan jir baa lexo jeclo ku baro
Likaha xaggee ololku ka maray
Lo'intey cidla ku geyso kuy kugu ciydaa
Lo'iyo haweenba abaar baa la cootaa
Loogi doonow looba joogee
Ludda jecli lafta jecli kala daa
Lug dambe lug hore ma dhaafto
Lugtaaney ninba mar ku qaad
Lugtii gooye isagaa u dhutiya
Luuq luuq maroow laamiguu yimaad
Ma tacbada ma tanaado
Ma rabtaa raqiis ma heysaa qaali
Ma sugto meher maleh
Ma dhamaado waqtigaad soo dhaweysataa

Maba dhalane dhawrteysan ogaa
Matag meeshaad rabto kuma geeyo
Mataano kalgaceyl bay isu xambaaraan tabar yarina way-isula dhacaan.
Majo dhiiqo ku jira midba mar baa la baxshaa
Majo ari hawl u qeybsan
Maxay nuugtaa maxayse ku nuugtaa
Maxaad qabtaa qalbigey u roon tahay
Madko kala cawde mid gardaranse Allaa og
Madmadcobe Allaa ku yaqaan
Madax dhego lagama waayo
Madax muuqda iyo middi saawira midna lagama samro
Madal markhaati dhigo masaajidna dhagax
Madi qoodhiisaa la walaal ah
Madiidin qoodh maaha
Madow waa midab maariinse waa qurux
Mar i dage Allaha dago mar labaad i dagase anaa isu dagay
Mar uu neceb yahay dhibtoodaa mar uu jecel yahay dheefsada
Marti loo qad in lala qabane is moodday
Marti habeen anne ma wareysto iyane subixii iima waranto
Marti waa digato iyo tiigsato
Martida hore reerkaa ka naxo martida dambane iyadaa iska naxdo.
Maroodi faantii ma cusleyso
Maroodi mirasho ma daayo
Maroodigu takarta saaran ma arkee maroodiga kale tan saaran buu arkaa.
Mas baa abuur dhala
Mas madaxaa laga dilaa

Mas intuusan kugu candhuufin baa lagu candhuufaa
Maskaxdu mar way tagtaa marne way timaad
Maskaxdu mayirka bay u magan tahay
Masaar ceel ku dhacday mar baa la helaa
Masaari geed ma goyso ee geed kalaa ku gooya
Macal cune soo bixi doonee
Macallimow waxaad fashayba fashay
Magac iyo masiibo maalin bay dhacaan
Magaalo qeyrkaa u cay adne ha deyn
Magaalo waa madal inta joogtaane waa marag
Maqal duunyo ninkii kororsadow mindiyo tumo
Maqal qabe waa been qabe
Malab malab lagu daray macaan waa u sidiisi miisaan baane u kordhay.
Malaay bannaan ma yimaad ee makaadin lee keento
Malo dembi leh dembine cadaab leh
Malo rag waa nooli
Manfac haddii lagu siiyo murdiye lama noqdo
Maashaan la sarin waa dambey sare kacaantaa
Maal nin leh baa dhaqa
Maal waa miskiin
Maal oday buu leeyahay ee adeer maleh
Maalkaagu ha i bixin buu ku yiraa haddaad i bixisane ha igu daba dhiman.
Maalkaaga iyo gawskaaga waa lays baraa
Maalin iyo habeen midba hawl mudan
Meyd baa canaan waayay

Meyd kan la sii sido baa ugu dambeeyay
Meeshii nin kaaga dheeraado nin baa kuugu soo dhawaado
Meeshii waxaro ka yeeraan waraabaa ka yeero
Meeshii aad ku qoydo waa lagu qalajistaa
Meeshii iftiin yimaad mugdi waa ka baxaa
Meel bugta iyo fartaa is og
Meel dayax joogo xiddigo wax kama iftiinshaan
Meel roob ku da'ay reys lagama waayo
Meel sey u taal baa loola yaal
Meel gabari joogto garoob waxba kama gooyo
Meel lag lagu cunay lafo laguma ruugo
Meel lagaa jecel yahay haddaad ka tagto meel lagaa neceb yahaa tagtaa.
Meel madaxa ka sarreysa oo la salaaxo ma jirto
Meel mir ku da'day mooro kuma baaba'do
Meel waa laga maqnaadaa amo waa laga muuqdaa
Meel hadal u baahan hoo wax kama tarto
Meel hal lagu qalay mana hadal yara mana hilib yara
Meel hoo u baahan hadal wax kama taro
Meel aar ka kacay atoor fadhfadhiisay
Meel aanad ku hurdeyn laguma gamaayoodo
Meel aanad mari jirin haddaad marto meel aanad tegi jirin baa tagtaa.
Meel il laga la'yahay haddaad tagto il baa layska ridaa
Middi isma yeeyeesho
Mire barde cayayuub baa loo cunaa
Mire gunti ku jira kuwa geed saaran looma daadiyo

Miro nimaan cunin ma qabtaan
Misbaax minankeedi u baahan yahay meel kale lama geeyo
Miskiin baa misko la fuulo leh
Miskiin laba iyo toban ulood baa loo heystaa
Milil dushii lama dhayo
Min haddaad gasho meela dayday lama noqdo
Mingis ruux aqoon iyo akhlaaq leh kuma dhaco
Mudac iyo middi midba meel mudan
Muddacii marag haysta maaro maleh
Muddo ma dheero xitaa haddii ay aakhiro tahay
Muddo maalin ka yar iyo marti nin ka yar midna lama arag
Muddo iyo meel loo socdaba waa la gaaraa
Muddul ninkii dhisaa ka weyn
Murti ma duugowdo
Murti iyo mas'alabo meeshii loo wadey dhacaan
Muran rag waa isku murgaa
Muruqa labo suulle ninba si ku ah
Mukulaal minankeedi joogto miciyo libaax bay leedahay
Mulac carruurtu way ku ciyaartaa isna waa ka naf
Munaafaq mugdi iyo maro madow buu isku qariyaa
Munaafaq adduunyo kama dhergo muuminne biyo
Na tag amo joog naag wax uga daran
Nab naar ka kulul
Nabsi qabe nolol ku dambee
Nabsi waa ma guuraan
Nabsi adduunyo nabsi aakhiraa ka daran
Nabad gelyo iyo naagtoo

Nabiyow ninba af kugu ammaan
Naxariista Eebbe loo siman
Nasiibkaagu maxaad rabtaa mar buu ku yiraa
Nacasnimo ninkeedey dhibtaa
Naf walba naftaadaa laga mid dhigaa
Naf Ilaahey uumay nabsi lagama galo
Nafti gabe naf kale ma kalkaalo
Naftu meel ay rabtu uun baa lagu nasiin karaa
Naftu waa mid qura ee ma jiro toban nin haystaa
Naftu orod bay kugu aamintaa
Naar gale iyo nasiibkiis
Naari meeli qabow maleh
Naas walaalkey qabtay waa hadbo sidaan ka dhigto
Naag been baa lagu soo xero geliyaa run baase lagu dhaqaa.
Naag xun iyo abeesaba afkooda dila
Naag dalaaqi saaran tahay reerkaa rabbi ku diraa
Naag rag ka guurso amo rabcad ka guurso
Naag dhito xun iyana ku murud la'
Naag cirkeeda cunto iyo casirkii huruddaa u xun
Naag kas ha lahaato kartina ha lahaato
Naag kun iyo kow baa koodisa kowgaane guursada
Naag la furay fadhi uma yaal
Naag meher baa xira ninne ballan
Naag nin dhali kara ayaa dhaqi karo
Naag nin ay taqaan col ma mooddo
Naag waa jebiso kabane iyo kabiso jabane
Naag yaraan maleh

Naag u samir amo ka samir__
Naagtii ninkeeda diido nin kaley hoos ku waddaa
Neef la gowracay geed kama waabto
Nirgo geel ninkii qaadaba waa iska dhigaa
Nimaad beri ku baran weyday bil kuma baratid
Nimaad taqaan yaa tahay lama yiraa
Nimaad dhashay kuma dhalin
Nimaad fadhi kaga adag tahay looma sare kaco
Nimaad kabtiisa toleyso oo kafantaada tolaaya
Nimaan baqin ma baxsado
Nimaan baqin waa loo baqaa
Nimaan talin jirin hadduu taliyo nimaan tegi jirin baa taga.
Nimaan dantiisa aqoon baa dad u liita
Nimaan shageysan ma hodmo
Nimaan shantaada kaa reebin sharci kaama reebo
Nimaan dhul marin dhaayo maleh
Nimaan cadaw laheyn ma jiro
Nimaan qeybin jirin hadduu qeybiyo nimaan qadi jirin baa qada.
Nimaan qooq jebin maroodi ma jebsho
Nimaan kugu eod aheyn kugu calool maaha
Nimaan kuu furi qoonin yuusan kuu rarin
Nimaan loo maleyneyn baa lur ka yimaad
Nimaan waxa jooga garan waxa soo socda ma garto
Nimaan warankaagu gelin weedhaadu ma gasho
Nimaan weer sugin waran ma sugo
Nimaan weertiisa laga baqin warankiisa lagama baqo
Nimaan hadlin habartiina wax ma siiso

Nin badaw ah ilbaxnimo kama degto
Nin badi qaaday xumbo cuskay
Nin barxaday ma bakhtiyo
Nin baahani barax ma diido
Nin baahani waa nin careysan
Nin been yaqaan waa nin fal yaqaan
Nin bukaa ma bilna
Nin bukow boqoli kuu talisay
Nin talo xumi tabaalo ma weydo
Nin tiin beeray suuf uma soo baxo
Nin jirkii biyo kama hagrado
Nin xasilan xafar ma rido
Nin xag Eebbe ka nabdoon xuma aadane waxba kama tarto
Nin xil qaaday eed qaad
Nin xiirani ma xarakoodo
Nin xoog leh baa xaajo u toostaa
Nin xumi xoolihii kaa leh
Nin dabeecadii laga waayay waa dudumo ciid laga waayay
Nin dakhran dabadii nin dilan baa laga dayaa
Nin dameer wato dad la tooyasho maaha
Nin duulay dantii kaa og
Nin reer dhaqay wax ma moogo
Nin rooni ma raago
Nin sacab tumay cilaaq dalbay
Nin samraa sed leh
Nin sedkii waa nin suntii
Nin sigtay ma noola

Nin soo jeedo lama toosin karo
Nin sooriqaaday waa nin seefi qaaday
Nin subag dilay su'aal maleh
Nin shir ka tegay siigo yaraa
Nin shimbir gaadaayo waraf ma xooro
Nin dhashay ama dhidid amo dhimay
Nin dhergey dhug maleh
Nin dhego adag dhaay lo'aad ugu yeer
Nin dhintay kabihiisaa dhaamo
Nin dhumaayo dhug maleh
Nin carooday laga badi
Nin cirweyn cawo noolba qatan
Nin ciidan daran curadkiisuu ceeriin ku cunaa
Nin ciil qabo lagama adkaan
Nin cunno jecel ceymo maleh
Nin gabban jiray looma gabbado
Nin gaboobay soo goday
Nin gardarani ma guuleysto
Nin geel raaci jiray oo geel kale u tegey hashaa magaceed uun buu kororsaday.
Nin gu' kaa weyn gu' baas kaa weyn
Nin gunti xumi inuu wax qarsanaayaa la moodaa
Nin guursaday xuunsho xoolo mood
Nin fadhiyo lama legdo
Nin faas leh qoryo ma waayo
nin qaawani qurux ma yeesho
Nin qoriguu tuuray qawdiisa kama naxao

Nin qosol badan nin qoonsimaad badan lama heshiiyo
Nin qoyani biyo iskama dhawro
Nin quud jecel nimaan u quurin baa dilay
Nin kasta adaa fiican baa foolka loo saaray
Nin kaa dhib jecel kaa dheef jecel
Nin kaa cunno jecel kaa ceeb jecel
Nin ku jecel baa laabtaada yaqaan
Nin ku dayey ku damac
Nin ku dilay hoos kuuma jiido
Nin ku siray wax kuu sheeg
Nin kuu baahan baa kugu bah ah
Nin kuu digay kuma dilin
Nin la jecel yahay ceebtiisuu ma muuqato
Nin la dhacay yuu dhicin
Nin la waaniyay wehel ma galo
Nin labo jir u fuushan yahay lama xanto
Nin lagu seexdow ha seexan
Nin madaxa ku socda iyo nin majaha ku socda waa is war moog yihiin.
Nin mar buu dhashaa mar buuna dhintaa
Nin magaalo diidow yaa ku og
Nin malaggi galay maareyn maleh
Nin mayir leh baa marti soora
Nin meeshuu jooga bay naagtii joogtaa
Nin meeli u cadahay meeli u madow
Nin nafti kaa jecel
Nin wax isku og iyo weel maranba way yeeryeeraan.

Nin walbow naftaa nabiyow ummaddaa
Nin waliba naagtuu caashaqo waa u cambaro-luula
Nin waliba wuxuu kaa doonaa kaa deego
Nin waliba wuxuu yahuu ku moodaa
Nin waliba intuu kuu jiruu kuu soo joogsadaa
Nin waalan jiray waalli loogama sheekeeyo
Nin waalan walaalkii baa u mayir qabo
Nin waalani waano diid
Nin waalani webi taraar
Nin waalani weyso uma dhawrno
Nin weyn iyo umuliso sida ay wax u og yihiin uma sheegaan
Nin wuxuu yiri diiday wuxuu dhalayhe wuu diidaa
Nin habari dhashay hal ma seegi waayo
Nin habaarani ma harsado
Nin hadley nin aamusaa bi'iyay
Nin hali ka luntay haan gacan geli
Nin hawlani hurdo kama timaad
Nin hawo badan wixiisa nin been badan baa leh
Nin hoostiisa dayaa hareertiisa ma dayo
Nin yari intuu geed ka boodo ayuu talo ka boodaa
Nin adduunyo joogow maxaad aragti kuu laaban
Nin arrintiisa rartay waa nin orgi rartay
Nin af leh baa abaar ka baxa
Nin aniga yiri dad iska sooc
Nin erey ku baray aabbe kuu noqoy
Nin ilko waaweyn hadduu dhimanaayo inuu qoslayaa la moodaa

Nin Ilaah leh looma dardaar weriyo
Nin intuu cunuu ciidamiyaa
Nin iyo jiilaal way lagdamaan
Nin iyo xabaashii loo kala tag
Nin ooman biyahaan hoo uun baa deeqa
Nin ul waayay qori qaadey
Ninba taagtii bay qodaxi ugu tagtaa
Ninba dahab lumay si u doondoon
Ninba dhan u badi
Ninba dhuuniguu cunuu dhiigeeda leeyahay
Ninba ceesaantii ceel keentay
Ninba qumanihiisaa qoorta ugu jiro
Ninba meeshii bugtaa isagey balbashaa
Ninba mirihii uu goosan geedkooduu yaqaan
Ninka dameerka watoow warkaagu waa kaa soo horreeyay
Ninkii boqol soomay beri kuma dari waayo
Ninkii dilay walaalkaa adne waa kuu dan leeyahay
Ninkii dirtiisa la bixin waayo saaxiibkiis baa la barbaa
Ninkii soo joog laga waayo soo jiifsaa laga helaa
Ninkii dhuuni kuu diiday ha dhintuu ku leeyahay
Ninkii ciid kugu rogay calooshiisuu ku tusay
Ninkii qeyrkii loo xiirayow soo qoyso adigune
Ninkii labaatan jir ku seexdo lixdan jir buu ku ordaa
Ninkii maagistaada raba dhudhunkaaguu ruxruxaa
Ninkii waaw yiraa isagaa laga war sugaa
Ninkii hadal kugu ciila aamus baa lagu ciilaa
Ninkii hashaada da'maala da'da dambuu kaa soo doonaa
Niyad kaa dadbani kuuma diir naxdo
Nolol geeri baa ka dambeyso

Wax badso wax beel bay leedahay
Wax badan joog aad wax badan aragtide
Wax jid laga helay jiijiitan maleh
Wax jira Allaa og
Wax rag kaa galay rako kaa galay
Wax garad waano ka dhan
Wax garad wuu dhintaa weedhiise way hadhaa
Wax gidgiddi wax ha kula gaddoomaanee
Wax kasta oo dhalaala dahab maaha
Wax la tiriyay taag yar
Wax la qariyay qurun baa ku jira
Wax la qariyay ama qubte amo qurme
Wax la waayay looma waasho
Wax la eryo been baa u gaabiso
Wax la isku og yaliay ceeb ma keenaan haddii ay keenaane canaan ma keenaan.
Wax ma hubsade beenlowgaa dhaamo
Wax wax ku siiya waad heshaa wax wax kuu sheegase ma heshid.
Wax is weydiin ma xumee wax is weydaaris baa daran
Wax il heyso ilaalo ka dhan
Wax indho arkaan baa ilko gooyaan
Waxa umusha u dan ah baa cunugga u dan ah
Waxaad barataa waa baaskaa
Waxaad taqaan guurso waxaad taqaan ha kuu dhashaanee
Waxaad soo waddo iyo webiga yaa weyn
Waxaad dhashay kuma dhibaan ee waxay dhaleen baa ku dhiba
Waxaad qabto ninkii qabaa lala degaa

Waxaad qarsato waa ku qarsadaan
Waxaad ka naxdo yaa kaa naxo
Waxaan daacad aheyn dabadey ka xumaadaan
Waxaan calaf aheyn lama cuno waxaan wed aheyna looma dhinto.
Waxaan gacantaada ku jirin iyo afkaagu waa kala raagaar
Waxaan kaa celinaayo ma xeerada salkeedaa
Waxaan ku hurreyn habaar laguma darsado
Waxaan lagu dhibboon laguma dheefsado
Wadar ma waalno ee waaxid baa waalan
Wadaad yuusan dad kuu eg kugu kihin
Wadaan geeleedi gabtay geel kale ma kalkaaliso
Wadaanta isha ka qaloocata feylkey la tagtaa
War jiraaba cakaaruu iman
War xun dugsi ma fadhiyo
War dhafoor buu ku yaal
War la qabo xiiso maleh
War la helaabo talo la hel
War la'aan baa col hodday
War ma heyside adduun waa weger
War meel dheer buu ku dhacaa waranne meel dhaw
War waa kii la iska maqlaa
Waraf iyo shimbiro war isuma hayaan
Waran kugu soo noqon doono lama rido
Waran naagi tuurtay ma dheero
Waran ninkii kugu dhufto kii kugu dhaqdhaqaajiyaa ka daran
Waran wed waa soo dedejiyaa
Waraabaha ciya kan aamusan baa ka daran
Waraabe barte mooyee bawdka ma arko

Waraabe talo xumaa looga dhaqan yahay
Waraabe dhankii loo eryabo waa u bannaan
Waraabe hadduu ku cunaayo axsan kaaga haku cuno
Waraabe ulna lala gaari waa ereyna wax looga qaadi waa
Waroow war baad eedday
Wacdi jaahil wax i sii baa u dambeyso
Wacad fure wareer ma waayo
Waqti kaa tegey looma taag helo
Waqtiga iyo waayuhu qofna ma sugaan
Walaashaa iskuma hubtid ee seedigaa ha iska xumeyn
Walàalo is nacay way xoolo yareeyaan wayna xabaalo badiyaan.
Wan weyn ilaa la gowraco indhihiisu cirka ma arkaan
Waneey adhi ninkii kaa rabo weyne geel buu ku weydiiyaa
Wahsadaa wiilkii ma korsho
Wavil weyraxeysa waddo looma seexdo
Waa la doogiye yaan la dacaroon
Waa la kala maadiyaa meel bugta iyo faro
Waa lay caayay ceeb baa kaa raacdo
Waad baahan tahay bakhti looma cuno
Waad duunyo yar tahay deeq looma daayo
Waarimeyside war hakaa haro
Waan rabaa roob lagu waayay
Waano uumis baa ka horreysay
Waayeel tag lama yiraa ee wuxuu ku tagaa la tusaa
Waayeel xanuunsaday xil ma garto
Waayeel cabsidii waa inta la arkaa

Waayeel caano daadiyay canaan maleh
Waayeel wax tus waxse ha u sheegin
Waayeel waxaa dhaamo wax garad
Waayeel hortiis baa caano lagu barxaa
Weji is yaqaan waa xayeesi
Wejigu waa baasaboor
Weyd beer baa u roon
Weysha qal dibigu haku quustee
Weynaadaa wanaagsanaada
Weel godan iyo wehelba waa la badsadaa
Weel guntuu ka tolmaa hadalne guud
Wixii dooxa daad baa qaada wixii daatane dabeyl baa qaadda
Wixii dhacay way dhaceene wixii dhiman aan dhaqanno
Wixii fudeyd kugu soo galay fudeyd bay kugu dhaafaan
Wixii nin ka xishoodo nin baa ku xarakoodo
Wixii aanad heleyn inaad ha hartaa habboon
Wixii uurka kaaga jira afkaa kaa xado
Wii kaneeco iyo way dumar midna lagama gam'o
Wiil waa socde gabarne waa sugto
Wiil is waalabo waabiyaa hela
Wiilkaaga walaal ka lahoow walaalkaane wiilal ka lahoow
Woow qur'aan iyo waa subxeed kala badan
Ha dhacdee miyaad leefi
Habar baas gabar baas bay soo ahaan jirtay
Habar dhali weyday aleelo ku waalatay
Habar fadhido legdan la fudud
Habar lug qashay loow qaaday
Habaryartii ku guure hooyadii uma negaado

Habaar dhammaantiis waa dhimo
Habeenkii aad dhereg filaneyso baahine filo
Hadbo sidaad u jabtaa loo dhutiyaa
Hadal badan haan ma buuxsiyo
Hadal been ah dheg been ah baa lagu dhegeystaa
Hadal reer magaal kaftan buu ku dhamaadaa
Hadal run baa lagu caddeeyaa ilkane rumay
Hadal garaawshiinyuu dad ku deeqaa hilibne biyo
Hadal lama harsado ee geed baa la harsadaa
Hadal ma ba'no ee hadal xumaa ba'an
Hadal murti leh iyo hilib mindi leh midna laguma mergado.
Hadal nin badiyay ma wada sheegin nin yareeyayne kama wada tegin.
Hadal nin si u yiri ninne si u qaadey
Hadal nin dhugtay baa ku dheelay
Hadal waa dan iyo daal
Hadal waa run kama reyste
Hadal waa dheh amo dhegeyso
Hadal waa murti iyo maad
Hadal waayeel waa guud mar
Hadal wuxuu ammaan yahay inta aanad oran
Hadal af dhaafay afaaf dhaaf
Hadal aan fiiro loo oran iyo caano aan fiiqsi loo dhamin feerahey wax yeelaan.
Haddaad taqaan bar haddaadan aqoonne baro
Haddaan la kala roonaan roob ma da'een
Haddaan makri meesha oo gelin maqaar ari waa na wada deeqaa.

Haddii dani timaad faan dhimay
Haddii dhib yimaad dhabaqo meel beeshay
Haddii geeri ku deyn laheyd gabow baan ku deynayo
Haddii fooli timaad guda garin dhamaatay
Haddii furuq yimaad waraabow faro ka leefleef
Haddii la dhimanaayo dhareerka waa layska tiraa
Haddii lagu sheelo waa lays sheegaa
Haddii malag dhawaago miidaamo dhego maleh
Haddii war waayeel la yeeli lahaa waraabe weyl ma cuneen.
Haddii webi engego lug baa lagaga gudbaa
Har ma geeyo eeddadiis ninkii hooyadii dilay
Harag libaax haad kuma degto
Harag maran side hawli uma yara habaarne u dheer
Harag adhi iiga kac mooyee iiga durug maleh
Hasha laba midigoodle dhangadeeyay dhanne uma fiyooba
Hasha maqaarka diideysa meel dalooshey ka daydaa
Hasha iyadaa rakaadka isu dheereysa
Hasha iyadaa geela cuni iyadaane cabaadi
Hashii soddon qaday saddex kuma dari weydo
Hashu maankeeyga gaddaye ma masaar bay liqday
Hal bacad lagu lisay
Hal booli ah nirig xalaal ah ma dhasho
Hal dideysa geed ay ku xoqoto ma weydo
Hal dhadig geel ma rimiso
Hal galgalaneysa labac ma weydo
Hal geel helideed dhib maaha ee dhaqideed baa dhib ah.
Hal la magac dhabay ama kacdey ama kuurkuursatay

Hal laac sare arkeyso lun hoose ma aragto
Hal libaax arkeyso ma godloto
Hal waliba wiilka ay koriso ayaa wedkeeda leh
Haleey helidaa habeen loo leh yaa ku heyn karo
Hanti lama cunee dadkeedaa la cunaa
Hantiyey macaan waa middaan hooy lagaa oran
Hanqaraarac hal lug uma dhutiyo
Hawli waa qaboono qabasho
Hawadaadu been bay kuu sheegtaa hantidaaduse run
Haween waa balaayo loo baahan yahay
Hawo iyo hunguri hortaadaa laga dayaa
Hawo iyo hunguri hog bay kaa ridaan
Haadba haad kici
Haantii korkeedu calaw yahay hoosteedaa ka daran
Hibo Ilaahey ku siiyey habeen la isagama qaado
Hilmaan hadal kuma jiro
Hilib digaag deris ma gaaro
Hilib la tuugay heen maleh
Hodanimo Ilaah baa leh hibane ninkuu siiyo
Horweyn geel xusuus baa lagu waraabshaa
Horay u cune gadaal uma cuno
Hubsiimo hal dhan baa la siistaa
Hubkaa kaa war dheer
Hurdo galbeed waayeel way ka cadheysiisaa
Hunguri wax ka weyn la mariyo wuu dilaacaa
Hunguri wedkii ma arko
Hunnu hunnu hadal maaha himbiriirsina oohin maaha
Yaxaas hadduu afka kula waayo dabada kulama waayo
Yaa hal riman haanan looga eryaa

Abti waa hooyo aan naas laheyn
Abkey dooli dilow dad nool maas u daahaa
Abaal raaga rag baa leh
Abaal ka dhaca injirtaa laga bartay
Abaal nin galaa badan nin gudaase yar
Abaal waa nin galay iyo nin guday
Abeeso ku cuntay afka uma roona
Abeeso yeysan dhul kuu eg kugu dilin
Abeeso ul dheer baa la isaga leexiyaa
Aboor nimuu Alla u legduu cunaa
Axdi nin galay eed gal
Axdi aad u meel dayan waxa dhaanto maya
Adaa lahaa eedi kaama furato
Adeeg ma cabsado ee ninkiisaa cabsado
Adigaa qoysanaayee yaa kuu qoor jaraayo
Adigaa heliye haashka ii dhiib
Adigoo ribix doontay raasimaal ma lumay
Adigoo harsan waayay ma laguu soo harsadaa
Adduun qabyo kama dhamaato
Adduun wax la arag waxne laaban
Adduun i khatal
Adduunyo waa sheeko iyo shaahid
Adduunyo waa geedka labadiisa gelin
Adduunyo orod laguma gaaro
Adduunyow xaalkaa ba'
Aragiisu ku deeqaa oontiisu ku deeqdaa
Aroos labada is rabta maahee inta kale waa hawl beel

Aroos laguma raago lagamana raago
Arrad waa dan uskagse waa doqonimo
Arrin xumo abaar ka daran
Arrin rag waa mudacyo afkood
Arrin ku dhaaftay aah kuma soo noqoto
Arrin nin galay eed gal
Arrin aan bilowga ka toosin dhamaad kama toosto
Arrin isku dhan mar bay kuu timaad
Asraar iyo abaal ka dhac rag wax uga daran
Askari jidkii yaqaan janan ma yaqaan
Askari askari baa xira
Adhi been waa ka didaa umase dhutiyo
Agoon nimaan wax u tareyn baa madaxa u salaaxo
Af baa la xukmin karaa ee uur lama xukmin karo
Af been u bartay waa u boholyoobaa
Af joogo looma adeego
Af xumo rag waa ku kala tagaa
Af xumo nabad waa kaa waddaa colaadne wax kaagama tarto.
Af daboolan waa dahab
Af caytamo ninkiisuu ku yaal
Af ku leeble il ku leebluu ku tusaa
Af macaan gacan macaan baa dhaanto
Af nooli hadal ma daayo
Af wax cunay xishoo
Af waa ekeeye addinne waa kala reebe
Af wixii ka soo dhaco gar baa iska leh

Af aamusan lama xujeeyo
Afkaaga kala taag ilkahaaga aan tiriyee
Afkaaga waxaad ka tiraa aqtaadaa laga dayaa
Afkaagoo ku xira oo aan ku furin Alla kaa gooy baa-
la yiraa.
Afkii ba'ay yiri tubti waa karaa
Afar lugoodle oowrkiisa la xushaa laba lugoodlene
aradiisa la xushaa.
Afar indhood baa arrin goyso
Afeef hore lahoow amo adkeysi dambe lahoow
Aqal tiir la'aan bay dabeyluhu u tuuraan
Aqoon darro laga roon
Aqoon waa indho muggood
Aqoon yari waa khatar badan tahay
Aqooni arag kama horreyso
Alif kaa wareero albaqruu ku dhibaa
Alle la kala baryi og erayna la kala oran og
Alle wate wehel uma baahna
Alle aamin ma iisho
Alloow nimaan wax ogeyn ha cadaabin
Ama beec baro amo been baro
Ama ceebow amo ceyroow
Amar dawlo mudeec ninkii diido dabbaal
Amarkii Ilaah iyo waqtiga waa wax ka adag
Amaano kugu raagtay xoolahaagaad mooddaa
Amuuri waqtigeedey falantaa
Anigii roonaa bay i rogatay

Anoo bannaan arkaya maxaa buuraha i saaray
Awr xamalkiisa waa qaadaa xarig qaloocase ma qaado
Awr qooqay ma tabar yaro
Awr kala guurtay ma xumee uur kala guurtay baa daran
Awr dambe awrka hore saanqaadkiisuu leeyahay
Awrka iyo ninka wado hoggaankaa u dhexeeya
Ayax teg eelna reeb
Ayaanley aqal ma weydo
Aan dubanno iyo aan karsanno fuudkaa ku dhuma
Aan ku bariiyee meel beydhsan seexo
Aabbow kan yar iga celi kan weyn baan iska celinayaahe.
I jiid aan ku jiidee waa gacmo daalis
Irbad ururtay masaar bay noqotaa
Irbadda dharka dadka toshaa iyadu waa qaawan tahay
Is jiid jiid injirtu waa ku dhimataa
Iskaashato ma kufto
Isku dayasho dameer baa ku rintay
Isma oga agoon iyo ninkii aabbihiis dilay
Ismaqal bay ummadi dhereg ku gaartaa
Ismoog aqalkii bay asleysaa
Isu roon ma ruqato
Ishaa macallin ah
Ishaadu waa kula da' dhegtaaduse waa kaa weyn tahay
Ishii dhiman weydo geel dhalaa bay ku tustaa
Ishii laga arkaa ushii lagu dilaa
Il ribix arkeyso rixin ma dhawrto
Il nin riday wuu ilaawaa nin laga ridayse ma ilaawo

Ili wey dayaa badan tahay qoriga mudayase ma aragto
Ili il ma dhawrto
Ilko wadajir kay wax ku gooyaan
Ilko abeeso hoos bay ka xiriiraan
Ilmo shabeel laa qaato
Ilmo korintood kala celintood baa ka daran
Ilmo waalidkood ka weyn ash maaha
Ilmo adeer waa in is taqaan
Ilmo adeerkood waa kii hadba habartood qabo
Ilmo aabbahood jooga lama xiiro
Ilmo aabbahood u eg odeyguna ku uursan habartuna ku eed la'.
Ilmo edeb daran ama uli ku tiil amo ili ku tiil
Ilaahey ma naxee waa naxariistaa
Ilaahow adaa na oge hamna sheegin
Ilaahow aqoon la'aan hanugu cadaabin eexane hanagaga tegin.
In badan oo kuu bannaan edeb baa kaa reebto
Inta jiilaal loo adkeysto jir roob looma adkeysto
Intaad xadi laheyd xoogso
Intaad gaari dooneysid baa goombaari ubadkeedu ciidamiyaa.
Intaad falin ka fiirso
Intaad qaleysay anne waan qaybinaayey
Intaan Ilaahey ka aheyn wey geftaa
Intii baal laheyd way buubtay doorase wey xujowday
Intii beenowdo geeri baa u roon
Intii wax la baro oo bar laga naqo dumar baa u daran
Intii ay baaqan laheyd ha yaraato

Intii ay dhogortaadu dhan tahay baa la dhawrsadaa
Intii ay nabaddu joogtaa ninba labo nin le'eg yahay
Intii uurku [illegible] buki lahaa addinku haku buko
Indheer gar[illegible] rag way ku yar tahay dumarne kuma jirto.
Indho jaceyl isma eegi karaan
Indho run bay ku ooyaan
Indhool maalin iyo habeen midna wax arko
Inkaar waalid waa eebo kugu taal
Iimaan badan waa uurka muggiis
Iimaan Allaa uur buuxsha
Onkod wuxuu dawaareeyaba dulucdiisu waa meel
Ood sidey u kala korreysaa loo kala qaadaa
Ood qaadis iyo jiidis waa isla guri geyn
Ukun xarig ma qabto
Ul jiifto ma jabto
Ul jiifto ama ha jabto amo ha joogto
Uli wey qabowdaa erey xumise ma qaboobo
Umuli wax ka ilowsho dhaw
Uur jiif habartii ku gowracan
Uun Alla Ilaah baa ka eed beela.

MAHAD CELIN

Runtii aad bay ugu yar tahay dunida maanta cid keligeed qaban karta shaqo aad loogu bogo amo loo jecleysto iyadoo aan helin dad aqoon iyo khibrad u leh hawsha ay qabaneyso oo ku gacan siiya.

Sidaas darteed waxaan jeclahay inaan halkan ugu mahad celiyo dhammaan saaxibadii iyo shakhsiyaadkii kala duwanaa ee igu gacan siiyay buugan hawshiisa muddadii dheereyd ee aan waday. Shakhsiyaadkaas oo si aan hagar laheyn oo xilkasnimo ah iigu dhiirri geliyay, iila ururiyay, habeeyay, saxay, garaacay, oo igala wada qeyb qaatay hawsha buugan kuwaas oo la'aantood uusan buuggan soo bixi laheyn waxayna kala yihiin:-

1. Maxamed Shariif Cabdi
2. Maxamed Naasir Sheekh
3. Nuur Maxamed Nuur
4. Maxamuud Cali Calasow (Jaanni)

Ugu dambayntii waxaan halkan ugu mahad celinayaa dhammaan shakhsiyaadkii kale ee iyaguna wax hawl ah uun ka geystay soo saaridda buuggan hase yeeshee aan magacooda halkan lagu xusin.

Qor:- Cumar Maxamuud Cilmi
" Cumar Suldaan "

SOOMAALI BEEN MA MAAHMAAHDO

Waa Buug ku saabsan Maahmaahyada Soomaalida sida Magaciisaba ka muuqato,waxaana ku qoran 1400/ Xabbo oo Maahmaah ah oo dhammaantood si toos ah iyo si dadbanba u saameya Suugaanta,[illegible],Dhaqanka iyo dhammaan Dhinacyada kala duwan ee nolol Bulshadeedka soomaaliyeed ee faca weyn leh.

Haddaba,si buugga Akhriskiisu u sahlanaado wuxuu u qoron yahay habka taxa shibbaneyaasha Af-Soomaaliga (ALPHABETIC ORDER) oo si heer sare ah loo habeeyay.

Buuggu waa kii ugu horreeyey uguna mudnaa ee laga qoro Maahmaahyada Soomaalida markii laga eego xag tiro iyo tayaba.

Sidaas darteed waxaa la rajeynayaa in Akhristayaasha xiiseeya wax akhriska gaar ahaane suugaanta ay aad uga heli doonaan buugan oo aad u qeexayo Magaca uu sito ee ah. "SOOMAALI [illegible] MAAHMAAHDO".

QORE CUMAR MAXAMUUD CILMI

- C. SULDAAN -